## Warbixinta Sannadlaha ah ee Hagidda Isku-dhafka ODE 2024-2025

**Xog Ku Saabsan Warbixinta**

- Warbixinta sanadlaha ah ee 2023-2024 Hagidda Isku-dhafka ah waxaa ay tahay in kama dambeys lasoo gudbiyo Sebtember 30, 2025.
- Natiijooyinka iyo istaraatiijiyadaha kujira Qorshaheena Hagidda Isku-dhafka ah ee 023-2024 waxaa toos looga soo bixiyay ahmiyadaha kujira Horay Usocoshada Ayadoo Lawada Jiro. *(2024-25 Qorshaha Isku-dhafka ee Istaraatiijiyadaha + Natiijooyinka ama w/Strategies + Outcomes)*
- Jawaabtan waxaa la qoray iyadoo lagu salaynayo xeeladaha PPS iyo natiijooyinka guud ee ma aha oo kaliya Qorshaha Hagitaanka Isku-dhafka ah, kaas oo ka dhigan qiyaastii 2-3% miisaaniyadda PPS.
- Warbixinta sannadlaha ah waa in lagu soo qoro boggeena internetka ama mareegteena waana in lagu soo bandhigaa shir furan oo Guddi.
- Tani waxay la jaanqaadeysaa jawaabaha kujira Warbixinteena Sannadlaha ah ee 2023-2024

## Su'aalaha Warbixinta Sannadlaha ah

**Su'aalaha Warbixinta Sannadlaha ah**

**AR1. Adigoo dib u eegaya calaamadeeyayaashaada dhanka horumarka/jawaabaha milicsiga guud kana fakaraaya fulinta qorshaha, sidee u aragtaa horumarkaaga ka qayb qaadanaya Natiijooyinka iyo Xeeladaha qorshahaaga iyo Yoolasha Kobaca Waxqabadka Dheeraadka ah (LPGT)/Cabbiro Ikhtiyaari ah oo Maxalli ah (LOM)?**

Hirgelintayada 2024-25 waxaa lagu saleeyay go'aan sii qoto dheeraanaya oo ku wajahan natiijooyinkeena guusha tacliinta, gaar ahaan marka aan bilaabayno hawlgelinta Qorshahayaga Horumarinta Socota ee Degmada (DCIP).Labadii rubuc ee hore ee sanadka waxay diiradda saareen in la iswaafajiyo dhaqamada waxbarida, nidaamyada qiimaynta, iyo istraatijiyadaha waxqabadka ee lajira Yoolasheena Kobaca Waxqabadka Dheerarka ah (LPGTs). Guud ahaan iskoollada, hoggaamiyayaasha waxbarida iyo kooxaha xafiiska dhexe waxay ku hawleen wareegyada xogta iyo tababarida ku wajahnayd Qaab-dhismeedka Waxbarida PPS, manhaj tayo sare leh, iyo halbeegyada guusha ardayda.

Waxa sanadkan uga duwan yahay waa qaabaynta geeddi-socodka DCIP. Markii ugu horraysay, dhammaan iskoolladu waxay ka qayb qaadanayaan wareegyada horumarinta habaysan ee ku salaysan xeeladaha iyo tillaabooyinka guud ee bilaabmaya sannad dugsiyeedka 25-26. Wareegyadani kaliya ma kordhin doonaan isku xirnaanta waxbarida iyo qorsheynta ardayda ku saleysan, laakiin sidoo kale waxay ka caawin doonaan kooxaha inay cabbiraan saameynta ay ku leeyihiin kooxaha ardayda ee ka hadlaya arrin gaar ah ayagoo adeegsanaya waadaxnimo intii hore ka badan.

Waxaan sidoo kale qaadaynaa tillaabooyin ula kac ah si aan u kordhinno faseexnimada xogta iyo go'aan qaadashada heerka iskoolka. Isku darka qaab dhismeedyada iskoolka ku salaysan ee PLC iyo taageerada dhexe, sida falanqaynta xogta ee MAP, qorshaynta waxqabadka ee MTSS la jaanqaadeysa, iyo borotokoolka tababarka, ayaa kordhinaya is waafajin ka dhexeysa waxqabadka maalinlaha ah iyo LPGT-yadayada. Natiijooyinka horudhaca ah ee OSAS waxay muujinayaan guulo dhexdhexaad ah oo laga gaaray wax aqriska iyo xisaabta guud ahaan, iyadoo heerarka fasallada qaarkood ay muujinayaan koritaan qoto dheer marka loo eego kuwa kale.

**AR2. Halkee ayaad kala kulantay mixnado, caqabado, ama caqabado hortaagan horumarka oo ku wajahan Natiijooyinkaaga iyo Xeeladahaaga kujira qorshahaaga oo aad taageero u isticmaali karto? Ka hadal ugu yaraan hal Natiijo oo aad ku aragtay caqabado ama mixnado hortaagan fulinta.**

Dhowr caqabadood oo waaweyn oo nidaamka oo idil ku hor gudban ayaa saameeyay horumarka dhammaan natiijooyinka sanadkan.

Waxa inta ugu badan la xasuusan karo, wixii ka dambeeyay Noofambar 2023 joojinta shaqada ayaa cadaadisay jadwalka waxbarashada waxayna u baahatay maalgalin dheeri ah oo ku saabsan dhisidda xiriirka, hagaajinta xawaaraha, iyo dadaallada dib-u-howlinta, dib ula xiriiritaanka ama mar kale la shaqeynta dadka. Halka heshiiska gorgortanka loo dhan yahay ee ka soo baxay uu ka mid ahaa guulo muhiim ah oo laga gaaray magdhowga barayaasha iyo waqtiga qorshaynta, waxaa kale oo uu keenay cadaadis maaliyadeed oo degdeg ah iyo hoos u dhigista dabacsanaanta qaybaha kale ee nidaamka oo idil.

Intaa waxaa dheer, baahiyaha isbaddalaya ee isu dheelitirka diiwaangelinta iyo qorsheynta tas-hiilaadka waxay u baahdeen waqti badan oo shaqaale iyo la shaqeynta dadweynaha. Iyadoo isbeddelladani ay muhiim u yihiin sinnaanta iyo helitaanka muddada-dheer, waxay soo bandhigaan adayg ama culeys dhanka kala guurka ah oo u baahan isku-dubbarid taxaddar leh iyo wada xiriirid.

Ugu dambeyntii, hubanti la'aanta ku xeeran maalgelinta federaalku waxay keentay inaan aad uga taxaddarno ilaha maalgelinta iyo barnaamijyada la maalgeliyo. Tani waxay si gaar ah u saamaysaa natiijooyinka tacliinta ee Ardaydayada Luuqadaha Badan Kuhadla.

**AR3. 2024-25 Kaliya: Dib u eeg heerarka cabbirka dhabta ah marka loo eego LPGT iyo LOM oo horay loo abuuray oo nala wadaag fikirka horumarka. Sharaxaad ka bixi sida hawluhu u taageerayaan horumarka ku wajahan yoolalka iyo haddii isbeddello kasta oo hirgelinta istaraatiijiyadda ah loo qorsheeyo mustaqbalka iyadoo lagu salaynayo horumarkaas hadda socda. Ku dar cabbirro ama tilmaameyaal gaar ah iyo noocyada yoolasha milicsigaaga**

Waqtiga warbixintan, xogta muhiimka ah ee cusboonaysiinta jawaabtan ayaa weli waxaa saaran cunaqabataynta dawladda oo macnaha aanan doonayn in la shaaciyo, iyada oo xaddidaysa waxa aan awoodno in aan si guud ula wadaagno dadweynaha. Warbixin leh cabbiro gaar ah ayaa la heli doonaa bisha Noofambar, ka dib marka la sii daayo natiijooyinka gobolka oo dhan. Waqtigaan hadda la joogo, PPS waxay sii wadaysaa xoojinta adeegsigeeda xogta deegaanka ama gudaha ee maxalliga ah si ay u hagto wax barid iyo wargelinta xeeladaha taageerada ardayga. Horumarka laga gaaray dhaqamadan xog-ogaalka ah ayaa hoos lagu sharraxay.

Iskoollada muujinaya horumarka ugu xooggan ee xagga **Yoolalka Kobaca Waxqabadka Dheerarka ah (LPGTs)** waa kuwa sida dhow ula socda ahmiyadaha degmada. Iskoolladani waxay si joogto ah u hirgeliyaan manhajka ugu muhiimsan, waxay ku hawlan yihiin **PLC-yada xogtu waddo** oo macna leh, waxayna sii wadaan diiradda xooggan wax saaridda ku aaddan **isku xirnaanta waxbarashada.** Caddaynta horumarka waxaa lagu arkaa adeegsiga baahsan ee **yoolalka waxbarasho ee cad**, **wax barida heerarka lawada aqbalay gaarsiisan,** iyo hirgelinta **waxqabadyo heersare ah oo ulakac ah** oo wax ka qabta waxyaabaha ka kala dhimman tacliinta.

Waxaa jira isbeddel muuqda oo ku saabsan sida **hoggaamiyeyaasha iskoolka iyo kooxaha waxbariddu** ay uga faa'iidaysanayaan xogta. Si sii kordheysa ayaa maamulayaasha iyo kooxaha hoggaanku ay u isticmaalayaan **xogta ardayda ee la kala saaray** si ay u aqoonsadaan kooxaha aan weli ku socon wadadii ay ku gaari lahaayeen yoolalka kobaca tacliinta. Tan waxaa ku jira **ardayda luqadaha badan ku hadla, ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah,** iyo ardayda **Madowga ah iyo Kuwa Dhaladka ah**, iyo kooxaha kale ee taariikhda sida kujirta adeegyada lasiin jiray aysan gaarsiisneyn intii la rabay. Iyada oo laga jawaabayo, kooxuhu waxay samaynayaan **hagaajinta wareegga dhexe** ee waxbarida iyo waxqabadyada si loo hubiyo in si sidii hore ka weyn laisugu waafajiyo baahiyaha ardayga iyo natiijooyinka degmada.

In kasta oo aanay weli u dhacayn si nidaamka oo dhan ah 24-25, iswaafajintaan sii kordheysa ee heerka iskoolka ee u dhaxaysa **kormeerka horumarka iyo go'aan qaadashada waxbarida** ayaa muujinaysa go'aan adayg intii hore ka qoto dheer oo xagga sinnaanta ah. Iskoollada gaaray kobaca ugu sarreeya waxay isticmaalayaan xogta waqtiga-dhabta ah macnaha waqtigaa la joogo si ay ula socdaan horumarka laakiin sidoo kalana si **ula kac ah loogu aqoonsado oo wax looga qabto kala duwanaanshiyaha, si loo ogaysiiyo taageerooyinka la beegsanayo**, iyo **dardargelinta kobaca** kooxaha ardayda ee taariikhda sida kujirta adeegyada lasiin jiray aysan gaarsiisneyn intii la rabay.

Ayadoo aan horay usoconayno, iskoollada muujinaya horumar gaabis ah ayaa la taageerayaa si loo xoojiyo adeegsiga **qaab-dhismeedyada PLC,** si loo sii qoto dheereeyo **iswaafajinta manhajka**, iyo in la dhiso awoodda ku xeeran **taageerooyinka heerka ee caddaynta ku salaysan**. Isbedelladan istaraatiijiga ah waxaa loo qaabeeyey si loo

hubiyo in dhammaan iskoolladu ay ku socdaan dariiqa ay ku buuxinayaan sharuudaha LPGT-yadooda, oo leh dariiqooyin cad oo lagula socdo, lagu hagaajiyo, oo lagu joogteeyo horumar waqti ka dib.

Iyada oo ku saleysan waxbarashadayada bartamaha sannadka, waxaan sameyneynaa isbeddellada istiraatiijiga ah ee soo socda:

1. Is dhex galka intaa ka adag ee ka dhexeeya wareegyada dhexe iyo heerka iskoolka ee DCIP/SCIP, oo leh nidaamyo intii hore ka cadcad oo loogu tala galay la socodka horumarka iyo hagaajinta wareegga dhexe
2. Hawlgelinta agabka la sifeeyey si loo hubiyo in dadka wax qabanaaya, macallimiinta, iyo hoggaannada nuxurka loo kala horraysiiyo iskoollada leh baahida ugu sarreysa iyo diiradda ugu cad ee horumarinta

3. Maalgalin intii hore ka qoto dheer oo lagu dhisayo faseexnimada xogta ee loogu tala galay kooxaha iskoolka, gaar ahaan tarjumaada natiijooyinka ku meel gaarka ah iyo qaabaynta waxbarid jawaabcelin leh

Sannadka 2024-25 waxaa uu calaamad u yahay isbeddelka sida aan uga fikirno horumarinta, laga bilaabo isbeddelka barnaamijka ee go'doonsan ilaa dhaqan nidaamka oo idil ah oo ah qorsheyn caddayn ku salaysan iyo waxqabad. In kasta oo waxyaabhaas kala dhimman ay jiraan, horumarkayagii ilaa maanta waxaa uu soo jeedinayaa in aanu dhisayno shuruudo loogu tala galay horumarin aad loogu siman yahay marka sidii hore loo eego taasi oo la joogteyn karo waqti ka dib.